



UJEEDO: (HESHIIS KU SAABSAN KIREYN DHUL)

Muqdisho Maanta oo ay taariikhdu tahay **28/08/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

Anaga oo Kala ah: **ABDIKADIR OSMAN MOHAMED**, Somali ah, Hooyo Faadumo Cabdullahi Faarax, Ku Dhashay: Kenya, Sanadkii: 25/02/1985, Degan Hodan, Sita Somali Passport, Lr. P01413936, Tel 0615544228, iyo **SAID ABDULLAHI EREG**, Somali ah, Hooyo Faadumo Cabdullahi Faarax, Ku Dhashay Somalia, Sanadkii 25/10/1978, Sita UK Driving Licence Lr. 9710258SA9CC 21, Waxaan heshiisnaan ku cadeynaynaa anaga oo xis qabna in aan ka kireeyney **MUNA ABDI MAHAMUD**, Somali ah, Hooyo Faadumo Maxamed Guuleed, Ku Dhalatay Muqdisho, Sanadkii 10/01/1985, Degan Hodan, Sidata Sweden Pass.no., Lr. AA3186417, Tel **0619905090** Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: (**Hodan**), Cabirka: (**56X34-Mt**), W.M.L: (**Rep.89122/MPN/2025**), **Tr. 18/02/2025**, Kana Soo Baxay Xafiiska Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble. Waxaana ku heshiinay qodobadaan soo socda.

DULUUCDA HESHIISKA

1. Kireeyaasha waxaay dhulkaan kor ku xusan ka kireeyeen **MUNA ABDI MAHAMUD**, oo hada kadib loogu yeeri doono kireeysato.
2. Mudada kirada waa **Todobo (7)** sano oo ka bilaabaneysa **01 Jan 2026**, kuna eg **01 Jan 2033**.
3. Qiimaha kirada labada sano ugu horeysa bishii waa **\$ 5,000** (Shan kun oo Dollarka mareekanka ah) loona hormariyey kireeyayaasha sedax bilood, marka ay mudadaas labada sano ah dhamaato sanadka xiga kirada waxaay bil walba noqoneysaa **\$5,500** (Shan kun iyo Shan boqol oo doolarka mareekanka ah), iyadoo sanadyadda harsan ay lacagta kirada ku darsan doonta **5%** loona bixin doono qaab Bil ah.
4. Kireeyayaasha waxaa loo hormariyay lacag **\$ 15,000** (Shan iyo toban kun oo dollarka Mareekanka) taas oo ah sedax bilood kiradooda.
5. Kireeysatada waa in ay bixisaa lacagta lag raba ee kirada kama dambees shanta bil walba.
6. Mudadaas iyada ah marka ay idlaato iska kireeyayaasha waxeey xaq u leeyihiin in ay u kordhiyaan kireeysatada mudada kirada ah hadii ay ku heshiidaan.
7. Kireestuhu marka ay dhamaato mudada uu heshiisnaan soconaayo oo ah Todobada sano waxaay dib ugu soo celinaysaa Maamulka iyo xaquuqda dhulkaas kireeyayaasha oo ah Milkiilayaasha dhulka.
8. Hadii Kireeysatada iska bixin weydo lacagta kirada oo laga raba bil walba, waxaay leedahay 2 bilood oo ogeysiis ah (notice), labadaas bil kadib milkiilayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay buriyaan heshiisnaan.
9. Canshuurta dhulka ee doowliga ah (Land Fees), waxaa iska bixinaayo bixinayo Milkiilayaasha.
10. Kireeysatada xaq uma lahan in ay cid kale ka kireeyso.
11. Biilalka Biyaha, tamarta Korontada, iyo Nadafadda waxaa iska bixinaayo kireeysatada.
12. Kireeysatada ugama ganacsan karto dhulka waxyaabaha ka horyimaadaaya Shareecada Islamka iyo Qanuunka dalka.
13. Hadii wax isbadal ah ku yimaado Heshiisnaan waxaa ka fadhiisanaya labada dhinac uu heshiisnaan Khuseeya.

Aniga oo ah **MUNA ABDI MAHAMUD**, Somali ah, Hooyo Faadumo Maxamed Guuleed, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 10-01-1985, Degan Hodan, Sita Sweden Pass.no., Lr. AA3186417, Tel **0619905090** Waxaan Heshiisnaan Dhankeyga Ka caddeynayaa in **ABDIKADIR OSMAN MOHAMED IYO SAID ABDULLAHI EREG** Ay iga kireeyeen dhulka ay Sare Uga Soo Hadaleen, Isla Markaana aan Aniga raali Ku ahay Kuna qancay Heshiisnaan Kiradda ah ee qodobadiisu Kor Ku xusan yihiin.

Anaga oo Kala ah 1- **SAID HASSAN HERSI** & 2- **IBRAHIM ABDI MOHAMUD** Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal Ka Nahay Heshiisnaan.

SAXIIXA KIREEYAHA GURIGA

ABDIKADIR OSMAN MOHAMED



SAXIIXA KIREEYAHA GURIGA

SAID ABDULLAHI EREG



SAXIIXA KIREYSTAHA GURIGA

MUNA ABDI MAHAMUD



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- SAID HASSAN HERSI

2- IBRAHIM ABDI MOHAMUD





(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1782/T.P.N/25, Tr. 28/08/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- ABDIKADIR OSMAN MOHAMED, 2- SAID ABDULLAHI EREG Ahna (Kireeyayaal), 3- MUNA ABDI MAHAMUD Ahna (Kireysato) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Kiradaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: ABDULL

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN WAREEJIN QEYB DHUL BANAAN OO DAMANYAALE AH

Muqdisho: Maanta oo ay taariikhdu tahay 18/02/2025, anigoo ah Dr. Saciid Cali Cosoble, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiiska ku leh Suuqa Bakaaraha, Daarta Osoble Apartments 1, agagaarka Masjidka Abuhurayra ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah dadka hoos ku xusan:

ISKA WAREEJIYE: Sadaq Aden Shiqdon, Hooyo: Halimo Salad Jama, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1972, Degan Muqdisho, Leh: Somali Passport, Lr. P01059373.	LOO WAREEJIYE: Abdikadir Osman Mohamed, Hooyo: Fadumo Abdullahi Farah, Somali ah, Ku Dhashay: Kenya, Sanadkii: 1985, Degan Muqdisho, Leh: Nira ID, Lr. 74368163435.
WARBIXINTA DHULKA LA WAREEJINAAYO Dhulkaan oo ku yaal: Muqdisho, Degmada: Hodan, Cabirka: (56X34)-M, W.M.L: 86682/MPN/2024, Tr. 01/02/2024, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble.	SOOHDINTA DHULKA Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Jid
ASALKII HORE EE DHULKA: Magaca: Ciise Cali Axmed, Cabirka: (56X34)-M = 1,904-MQ, Lehna Warqad Siin Dhul WHG/3/23/936, Tr. 21/08/1978, Kana Soo Baxay Wasaaradda Howlaha Guud, Waaxda Dhismaha iyo Dhulka.	

Hadaba qoraalka sare iyo kan soo socda oo wada xariira ayaa dhinacyada heshiiska waxay caddeynayaan sidatan:

WAREEJIYE: Aniga oo ah Sadaq Aden Shiqdon, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba kafiyoow in aan ku wareejiyey Abdikadir Osman Mohamed Qeybta aan ku leeyahay Dhul Banaan oo aan ku wada qoran nahay Aniga iyo Said Abdullahi Ereg, lehna tilmaamaha sare ku xusan, waxaan kale oo aan cadaynayaa in Dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara wareejintaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla Dhulkaan, wixii taariikhda sare ka danbeeyana Dhulkaan milkiyadiisa, faa'iidadiisa iyo bixinta canshuureedba waxaa si siman u wada leh Abdikadir Osman Mohamed iyo Said Abdullahi Ereg

LOO WAREEJIYE: Aniga oo ah Abdikadir Osman Mohamed, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in Sadaq Aden Shiqdon uu igu wareejiyay Qeybta uu ku leeyahay Dhul Banaan, lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan ka gudoomay kuna qancay wareejintaan.

MARKHAATIYAASHA: Anaga oo kala ah 1-Saciid Xasan Xirsi, 2-Ibraahim Maxamuud Qeyliye, waxaan qoraalkaan ku cadaynaynaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay wareejinta dhulka sare ku xusan.

SAXIIXA WAREEJIYAHA DHULKA


SADAQ ADEN SHIQDON




1- SACIID XASAN XIRSI

SAXIIXA LOO WAREEJIYAHA DHULKA

ABDIKADIR OSMAN MOHAMED



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

2- IBRAAHIM MAXAMUUD QEYLIYE



Rep. 89122/MPN/2025

(CADDEYNATA NOOTAAYAHA)

Tr. 18/02/2025

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1- Sadaq Aden Shiqdon (ahna wareejiyaha Dhulka), 2- Abdikadir Osman Mohamed (ahna la wareegaha Dhulka), iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiis kaan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Wareejin ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka.

NOOTAAYAHA

DR. SACIID CALI COSOBLE

By: AHMED




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 30/08/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **MUNO CABDI MAXAMUUD** Dukumiintiga **Original Kirada Rep No. 1782/T.P.N/25, Tr. 28/08/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Laga Kireeyaha	MUNO CABDI MAXAMUUD
Taariikhda Kirada	28/08/2025

Laga Kireeye: Aniga oo ah **MUNO CABDI MAXAMUUD**, Leh Tel No. **0619905090**, Degan **Hodan** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Kirada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

MUNO CABDI MAXAMUUD

Muna Abdi